

ANSHAXA SAXAAFADDA EE URURKA SUXUFIYIINTA JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Ururka Suxufiyiinta ee Somaliland waxa loo aasaasay si uu u ilaaliyo una horumariyo danaha saxaafadda iyo heerka noloshaha ee Suxufiyiinta xubnaha ka ah Ururka. Tani waxa sameyn karnaa oo kaliya marka aan ku dedaalno inaan ku dhaqano heerka ugu sarreeya ee anshaxa saxaafadda, isla markaana la xusuusto masuuliyadda kowaad ee ah inaan wigelino, maaweelino, waxbarno ra'yul caamka.

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland Qodobkiisa 32aad, waxa uu damaanad qaaday xorriyatul qawlka iyo madaxbannaanida Saxaafadda. Waa masuuliyadda SOLJA xaqiijinta heerka ugu sarreeya ee dhawrista iyo ku dhaqanka Anshaxa Saxaafadda, si ay u noqdaan codkii codlaawayaasha [The voice of the voiceless]

Qodobadan Anshaxa Saxaafadda ee hoos ku cad waxay tilmaamayaan masuuliyadaha saaran Suxufi kasta oo Somalilander ah:-

1. Waa waajibaad saaran suxufiyiinta in ay gaadhsiiyaan bulshada Macluumaad sugan oo xambaarsan Waxbarasho, Wargelin iyo Madadaalo.
2. Waxa ay bulshadu xaq ugu leeyihiin Saxaafadda inay ay ku Muujiyaan wax-soosaarkooda ilo-wareedyada meesha ama cidda ay ka helaan wararka.
3. Waa masuuliyad iyo waajib saaraan Saxaafadda inay u kala Soocaan bulshada wararka iyo aaraada ama afkaarta dadka.
4. Dadka isticmaala ama dhinaca Warbaahinta ugu shaqeysta baraha bulshada, waxa ku waajib ah inay ilaaliyaan oo ku dhaqmaan Xeerka anshaxa ee Suxufiyiinta Somaliland.
5. Waa waajib saaran Saxaafadda inay xaqiijiyaan oo sugaan Wararka, ka-hor inta aanay u baahin bulshada, sidaa si la mid ah ayey Mulkiilayaasha waajib ugu tahay, wixii ku-tidhi ku-teen ah ama laysla dhexmarayo ee warar ah, waa in siday ahaayeen loo dhigaa oo loogu gudbiyaa bulshada.
6. Waxa xaq loogu leeyahay Mulkiilayaasha Saxaafadda iyo Suxufiyiintaba oo ay mas'uuliyadi ka saaran tahay, in dhinacyada aaminsan aragtiyo kala duwan ama Khilaaf u dhexeeyo si siman u siiyaan doodaha ay kala Qabaan, go'aankana bulshada u dhaafaan.
7. Saxaafadda waxa xil ka saaran yahay inay noqdaan isku xidhaha [bridge] bulshada iyo Xukuumadda, iyagoo tabashooyinka bulshadu qabto u gudbinaya Xukuumadda, sidoo kalena bulshada gaadhsiiyaan dareenka Xukuumadda.
8. War iyo xog kasta oo been ah ama marin-habaabin ah ama Dhibaato ku keeni kara bulshada dhexdeeda, waa in Saxaafadda baahisay ay sida ugu Dhakhsaha badan u saxdaa.
9. Suxufiyiintu waa inay si adag u ilaaliyaan ilo-wareedyada qarsoodiga ah, waxase waajib Ku ah in il-wareedyadaasi yihiin kuwa la soo xaqiijiyey runimadooda iyo in Suxufigu ka caddeyn karo Garsoore kaliya hortiiisa, hadduu warkaa Qarsoodiga ahi noqdo mid xidhiidh la leh arrimo waxyeelneya amniga Qaranka.
10. Suxufiyiinta waxa ka reebban inay faraha la galaan arrimaha qofka/qoyska u gaarka ah, haddii aanay kellifin arrin dan iyo xiiso-ba u leh bulshada.

11. Diinta Islaamka ee muqaddaska ah, waxa ka xaaraan saxaafadda inay wax ka Sheegaan ama falanqeyaan, iyadoo aan u adeegsan Culimada.

12. Saxaafaddu waa inay ka digtoonaato inay si yasmo ah u xusaan qofka qabiilkiisa, Jinsiyaddiisa, midabkiisa, Diintiisa, miyir la'aantiisa iyo caafimaadkiisaba.

13. Waxa ku waajib ah suxufiyiinta in aanay ka hordhacin qaraarrada dacwadaha ka socda Maxkamadaha, waxana reebban in si mas'uuliyad darro ah loo baahiyo doodaha ka socda Maxkamadaha iyadoon laga xaqiijin Garsooraha.

14. Suxufi kasta oo qaata laaluush ama hadiyado looga dan leeyahay faafin war ama Xogo kale, waxa uu luminayaa dhexdhexaadnimadii waajibka ku ahayd iyo milgaha Anshaxa Saxaafadda.

15. Wax faaf-reeb ah laguma sameyn karo wararka ama xogaha kale ee ay Saxaafaddu gaadhsiineyso bulshada, waana waajibaad iyo mas'uuliyad saaran inay bulshada u gudbiyaan war sugan oo waxna laga reebin, waxna lagu darin.

16. Mulkiilayaasha Warbaahinta, Suxufiyiinta iyo dadka baraha bulshada waxa ka reebban soo bandhigidda Muuqaallo [Sawir ama Fiidyow] iyo baahinta dhiig qof ama dad oo uu sababay shil gaadhi, dagaal ama siyaabo kaleba, haddii aanay jirin dan lagama maarmaan u ah in la baahiyo.